

MA QABTAA SHUBAN-BIYOOD?

Waxaa sababi kara bakteeriya loo yaqaano *Shigella*.



Illaali naftaada iyo bulshadaada

Shigella wuxuu ku faafaa **SI AAD U FUDUD** hal qof ilaa qof kale. Haddii aad shuban-biyood qabto, **RAAC** tilmaamahaan fudud:



DHAQ GACMAHAAGA, gaar ahaan markaad musqusha aado kadib.



SUG inaad galmo sameysid ilaa shuban-biyoodkaagu gebi ahaan ka dhammaanaayo. Istmalaal difaacyadda (sida kondhomyada ama bacda difaaca afka) waqtiga galmaada.



HA U diyaarinin cunta dadka kale inta aad xanuunsantahay.



KA FOGOW dabaasha ilaa inta aad si buuxda uga bogsooneyso.

Calaamadaha waxaa ka mid noqon **karashuban-biyood, qandho**, iyo **calool majiir**.

Xitaa ka dib markaad dareemeysyo fiicnaan, weli waxaad kufaafin kartaa *Shigella* saxaradaada (saxarada) dhowr todobaad.

SIDEE DADKA U XANUUNSADAAN

Shigella wuxuu ku faafaa marka saxaro ka soo baxday qof xanuunsan ay soo gaarto qofka afkiisa. Xitaa qadarka saxarada mikroskobiga ah ayaa qof u keeni kara xanuun.



Gacmaha

Helitaanka *Shigella* bakteeriyyada gacmahaaga korkooda ka dib taabashada cuntadaada ama afkaaga.



Biyo

Laqida biyaha markaad dabaalaneysyo ama cabeyso biyo ku wasakhoobay saxaro leh *Shigella* bakteeriya.



Cunto

Cunista cunto uu diyaariyey qof xanuunsan (ama dhowaan xanuunsaday) oo qabo *Shigella*.



Galmo

La xiriirey jeermis ka imaaday saxaro inta lagu jiro xiriirkka galmaada oo lala sameeyo qof xanuunsan ama dhawaan la xanuunsaday *Shigella*.

Haddii aad u maleyneso inuu kugu dhici karo *Shigella*, la hadal dhakhtarkaaga.